**SOMALI TRANSLATION of the Department for Education statutory guidance for schools and colleges:**

## Keeping children safe in education 2022

## Part one: Part one: Information for all school and college staff

Find KCSIE Part 1 and also Annex A translated into 13 community languages at kcsietranslate.lgfl.net

NB this translation goes up to and includes the diagram on page 22 on the full version of part one (it does not include the Annex of Part 1 – which is Annex B in the full version; but Annex A, the condensed version of Part 1 is also available on our translation page).

Department for Education

# Dhawrista badqabka carrruurta waxbarashada ku jirta 2022

## Tusmada sharciga ah ee dugsiyada iyo kuleejyada

## Qaybta Koobaad: Macluumaadka dhamaan shaqaalaha dugsiga iyo kuleejka

**Sebteembar 2022**

# Faahfaahin kooban

Dhawrista badqabka varrruurta waxbarashada ku jirta waa tusmada aasaasiga ah ee laga doonaayo dugsida iyo kuleejyada ku yaala wadanka Ingiriiska inay raacaan marka ay fulinayaan waajibaadkooda ilaalinta iyo hormarinta faya dhawrka carruurta.

Waa muhiim in **qof kasta** oo ka shaqaynaaya dugsi ama kuleej uu fahmo waajibaadka ka saaran ilaalinta carruurta. Shaqsiyaadka maamulka iyo mulkiilayaasha xarumuhu waa inay xaqiijiyaan in shaqaalaha sida tooska ah ula shaqaynaaya carruurta ay akhriyaan ugu yaraan hal qayb oo kamid ah tusmada.

Shaqsiyaadka maamulka iyo mulkiilayaasha, la shaqaynaaya kooxahooda maamulka sare si gaar ahna hogaankooda ilaalinta badqabka, waa inay xaqiijiyaan in shaqaalaha aan tooska ula shaqaynayn carruurta ay akhriyaan midkood Qaybta koobaad ama araca A (qaybta lasoo koobay ee Qaybta koobaad) ee nuqulka buuxa ee dukumiintiga. Tani waa gabi ahaanba arin u taala dugsiga ama kuleejka waxaana lagu salayn doonaa qiimayntooda ku aadan tusmada waxtarka ugu badan u leh shaqaalahooda si ay u ilaaliyaan una hormariyaan faya dhawrka carruurta.

Nuqulka buuxa ee KCSIE waxaa laga heli karaa halkaan: Keeping children safe in education (Dhawrista badqabka carruurta waxbarashada ku jira) - GOV.UK (www.gov.uk)

# Xog ku saabsan tusmadaan

Waxaan adeegsanaa erayga **"waa qasab"** iyo **"waa in**" dhammaan intaan wadno tusmadaan. Waxaan u adeegsanaa erayga "**waa qasab**" marka qofka laga hadlaayo sharciyan laga doonaayo inuu wax sameeyo halka erayga "**waa in**" aan adeegsan marka qayb talo ay ah tahay in la raaco ilaa inay jirto maahee sabab macquul ah oo diidaysa.

## Dhibanaha iyo dhib gaystaha(s)

Ujeedada tilmaamahan, waxa aanu u isticmaalnaa kalmada '**dhibanaha**'. Waa kalmad si wanaagsan loo yaqaan oo loo fahmo. Waxaa muhiim ah in dugsiga iyo kuuliyaduhu ay aqoonsadaan in qof kastaa lagula kici karo tacadiyo oo ay iyagu u yihiin dhibane ama ay doonayaan in lagu sheego sidan. Ugu danbayntii, dugsiga iyo kuuliyadu waa inay la socdaan tan marka ay maamulayaan wixii dhacdooyin ah oo ay u diyaar ahaadaan isticmaalka wixii kalmado ah ee ilmuhu uu ku qanacsan yahay.

Warbixintan, waxa aanu u isticmaalnaa '**cida eedeysanaha ah**' iyo marka ay munaasabka tahay '**eedeysanaha**'. Waxaa weeye kalmad si balaadhan loo isticmaalo oo ku haboon erey bixinta samaynta kaalmada tilmaamta. Laakiin, dugsiyada iyo kuuliyada waa inay si wanaagsan uga fikiraan waxay noqonayso weedhu, gaar ahaan marka ay ka hor hadlayaan caruur, ugu yaraan mararka qaar habdhaqanka tacadiga ayaa waxyeelo ku ah dhig gaystaha laftiisa. Sida kor lagu sheegey, isticmaalka weedha munaasabka ah waxaa go'aaminaya dugsiyada iyo kuuliyada, sida ay kolba ugu munaasab tahay, taas oo kiisaska ku xidhan.

# Qaybta Koobaad: Macluumaadka ilaalinta ee dhamaan shaqaalaha

## Waxa ay tahay in shaqaalaha dugsiga iyo kuleejku ay ogaadaan ayna sameeyaan

### Hanaan diirada saaraaya caruurta iyo wada shaqaynta si loo ilaaliyo nabad galyadooda

1. Dugsiyada iyo kuleejyada iyo shaqaalahoodu waxay qayb muhiim ah kayihiin hanaanka balaaran ee ilaalinta badqabka caruurta. Hanaankaan waxaa lagu qeexay tusmada sharciga ah Working Together to Safeguard Children (Kawada shaqaynta Ilaalinta Caruurta).

2. Ilaalinta iyo hormarinta fbadqabka caruurta ayaa ah masuuliyad **qof kasta** saaran. **Qof kasta** oo caruurta iyo qoysaskooda xidhiidh la samayn kara waxaa uu leeyahay kaalin uu ka ciyaarayo. Si loo buuxiyo masuuliyadan si wanaagsan, dhamaan dadka xirfadlayaasha ah waa inay xaqiijiyaan qaabkoodu inay badhtan u yahay ilmuhu. Tani waxay kadhigan tahay inay kafakaraan, markasta, waxa ay tahay **maslaxada ugu fiican** ee ilmaha.

3. Majiro adeeg sameeya kaliya oo haysan kara sawirka baahiyaha buuxa ee ilmaha iyo xaaladaha uu kujiro. Hadii caruurta iyo qoysasku helayaan caawimaada saxda ah xiliga saxda ah, qof kasta oo lakulma ayaga wuxuu door kuleeyahay aqoonsiga walaacyada ay qabaan, uu lawadaago macluumaad uuna qaado talaabo degdeg ah.

4. Ilaalinta iyo hormarinta faya dhawrka caruurta waxaa lagu qeexaa marka aga fiirsho ujeedooyinka tusmadaan:

- ka ilaalinta caruurta si xun ula dhaqanka
- ka hortaga laxaad la'aanta caruurta ee maskaxda iyo caafimaadka ama korniinka jidhka
- xaqiijinta in caruurtu u korto qaab waafaqsan bixinta daryeelka amaanka iyo wax ku oolka, iyo
- qaadista talaabo si loogu sahlo in dhamaan caruurtu helaan natiijooyinka ugu fiican.

5. Caruurta waxaa kujira qofkasta oo kayar da'da 18 sano.

### Doorka shaqaalaha dugsiga iyo kuleejka

6. Shaaalaha dugsiga iyo kuleejku si gaar ah ayay muhiim uyihiin maadaama ay leeyihiin awood ay ku aqoonsadaan walaaca ilmaha xili hore, inay kor u qaadaan faya qabka carruurta iyo inay siin karaan caruurta caawimaad, ayna kahortagi karan in walaaca ay caruurtu qabaan kasii daro.

7. **Dhamaan** shaqaalaha ayaa ka masuul ah bixinta deegaan amaan ah oo caruurtu wax ku baran karto.

8. **Dhamaan** shaqaaluhu waa inay diyaar u ahaadaan aqoonsiga caruurta kafaa'idaysan karaan caawimaad hore.[1] Caawimaad hore waxaa looga jeedaa in taageero lasiiyo ilmaha isla

[1] Macluumaadka faahfaahinaya kaalmada hore waxaa uu ku jiraa Cutusbka Ka Wada Shaqaynta Ilaalinta Caruurta.

marka dhibaatadu timaado xili kasta oo kamid ah nolosha ilmaha, lagasoo bilaabo sanadaha ay saqiirka yihiin ilaa markay gaaraan dhawr iyo toban jiro.

9. **Wixii xubin shaqaale ah** ee qabta **wax** walaacyo ah ku saabsan badqabka ilmaha waa inay raacdaa nidaamka ku qoran qaybta 51-67. Shaqaaluhu waa inuu diyaar u ahaadaa kataageerista shaqaalaha arimaha bulshada iyo wakaaladaha kale iyaga raacaaya wargalinkasta.

10. Dugsi iyo kuuliyad **kasta** waa inuu yeeshaa cid hogaan loo isgmaday ilaalinta oo siiya taageero shaqaalaha inay qabtaan hawlaha ilaalinta oo ay si dhaw ula shaqeeyaan adeegyada kale sida daryeelka bulshada caruurta ee maamulka deegaanka.

11. Hogaanka badbaadinta ee shaqada loo magacaabay (iyo cid kasta oo kuxigeeno u ah) waxay ubadan yihiin inay haystaan sawirka dhamaystiran ee ilaalinta ilmaha uuna noqdo hogaanku qofka ugu haboon ee katalo bixinaaya jawaabta laga bixinaayo walaacyada dhanka amaanka.

12. Heerka udagsan Macalinka ee 2012 ayaa dhigaaya in macalimiinta (kuwaasoo ay kujiraan hogaanka macalimiintu) laga rabo inay ilaaliyaan faya dhawrka caruurta ayna joogteeyaan kalsoonida dad waynuhu kuqabaan xirfada macalinimada taasoo qayb ka ah waajibaadkooda xirfadeed.[2]

## Waxa ay shaqaalaha dugsiga iyo kuleejku ubaahan yihiin inay ogaadaan

13. **Dhamaan** shaqaaluhu waa inay la socdaan nidaamyada dugsiyadooda ama kuuliyada taageeraya ilaalinta, oo waa in tan loogu sharaxaa marka loo igmanayo shaqaalaha. Waa inay hanaanka kujiraan:

- siyaasada ilaalinta ilmaha (iyo waxyaabo kale oo la socda oo sidoo kale ay ku jiraan siyaasada iyo nidaamyada lagaga jawaabayo tacadiga ilme-ilme kale kula kaco)
- siyaasada habdhaqanka (oo ay KU JIRaan talaabooyinka lagaga hortagayo gardaraysiga, oo uu ku jiro gardaraysiga internetka dhaxdeeda, wax cuqdad ka kacay iyo gardaraysiga takoorka)[3]
- siyaasada habdhaqanka caruurta (mararka qaar loo yaqaan xeerka anshaxa) iyo waxyaabo kale, oo ay ku jiraan walaacyo yar, eedeymaha shaqaalaha iyo khashifida
- jawaabta ilaalinta caruurta ee ka maqnaada waxbarashada, iyo
- doorka hogaamiyaha loo magacaabay ilaalinta amaanka (ayna kujiraan aqoonsiga hogaanka loo magacaabay ilaalinta caruurta iyo cid kasta oo kuxigeeno u ah).

---

[2] Hererka Macalimiinta waxa uu khuseeyaa: cida lagu tobobarayo ee ka shaqayta QTS; dhamaan macalimiinta dhamaystiraya mudada u igmashada (macalimiinta sida cusub ugu qalma [NQTs]); iyo macalimiinta wajaaninta dugsiyada, oo ay ku jiraan dugsiyada gaarka loo maamulo, oo ay ku waajibto Waxbarashada (Amaanida Macalimiinta Dugsiga) (Ingiriiska) Shuruucda 2012.

[3] Dhamaan dugsiyada waxaa loga haana yahay inay yeeshaan siyaasada habdhaqanka (faahfaahin dheeraad ah halka). Hadii kuleej uu ubaahdo inuu dagsado xeerka habdhaqanka waa in loosheegaa shaqaalaha sida kor kuqeexan.

Nuqulada siyaasada iyo nuqulka Qaybta kow (ama Jaantuska A, hadii ay ku munaasab tahay) ee waraaqahan waa in loo ansixiyaa **dhamaan** shaqaalaha loo igmaday.

14. **Dhamaan** shaqaalaha la siiyay tobobarka ilaalinta iyo badbaadinta ilmaha (oo ay ku jiraan amaanka ee onleynka ah) wakhtiga loo igmadanayo. Tababarka waa in si joogto ah loo cusboonaysiiyaa. Sidoo kale, dhamaan shaqaalaha waa inay helaan macluumaadka ugu danbeeyay ee amaanka iyo ilaalinta guud (oo ay ku jiraan amaanka onleynka) (tusaale ahaan, waa inay ku helaan iimeel, daabacaad iyo kulamada shaqaalaha), sida loogu baahdo, iyo ugu yaraan sanadkii, si loogu sii wado xirfad iyo aqoon ilaalinta caruurta wax ku oolka ah.

15. **Dhamaan** shaqaaluhu waa inay la socdaan nidaamka kaalmada hore ee deegaankooda oo ay fahmaan kaalintooda.

16. **Dhamaan** shaqaaluhu waa inay la socdaan nidaamka u gudbinta daryeelka bulshada caruurta ee maamulka deegaanka iyo qiimanta sharciga sida[4] uu dhigayo Sharciga Caruurta 1989, gaar ahaan qaybta 17 (caruurta baahan) iyo qaybta 47 (ilmaha dhiban, ama ay u badan tahay in dhib soo gaadho, waxyeelo wayn) waxaa uu raaci karaa gudbinta, oo waxaa la socota kaalintiisa looga fadhiyo inuu ka ciyaaro qiimayntan.

17. **Dhamaan** shaqaaluhu waa inay garanayaan waxa ay samaynayaan hadii ilme uu u sheego in lagu tacadiyo, laga faa'idaystay ama la dayacay. Shaqaaluhu waa inay yaqaanaan sida ay umaaraynayaan shardiga ilaalinta heerka qarsoodinimada macluumaadka ee saxda ah. Tani waxay ka dhigan tahay in ay gacan ka gaystaan kaliya dadka loo baahan yahay inay gacanta la galaan, sida hogaanka ilaalinta loo igmaday (ama ku xigeenkiisa) iyo daryeelka bulshada caruurta ee maamulka deegaanka. Shaqaaluhu waa inaysan marna ilmaha ubalan qaadin inaysan cidna usheegi doonin warbixintiisa nooc kasta oo xadgudubka ah, maadaama aysan arintaani ugu danbayn noqon doonin maslaxada ugu haboon ee ilmaha.

18. **Dhamaan** shaqaaluhu waa inay u muujin karaan dhibanayaasha in la aaminay oo la taageeri doonto oo amaankooda la sugi doono. Dhibanayaasha waa in aan la tusin isha ah inay iyagu abuureen mushkilad marka ay ka warbixiyeen **wax** tacadi iyo/ama dayacaad ah. Mana ahan in dhibane marna la dareensiiyo inuu dareemo ceeb markuu soo sheego xadgudubka.

19. **Dhamaan shaqaaluhu** waa inay la socdaan in caruurta ay dhici karto inayna diyaar u ahayn ama ayna garanaynin sida loogu sheego qof in lagu tacadiyay, laga faa'idaystay, ama la dayacay, iyo/ama oo waxaa dhici karta inayna garanaynin inay la kulmeen waxyeelo. Tusaale ahaan, caruurtu waxay dareemi karaan xishood, bahdilaad, ama in loo hanjabay. Tani waxay ka iman kartaa inay nugul yihiin, laxaad la'aan iyo/ama rabitaanka jinsiga ama caqabad luuqad. Waa in ayna tani ka hor istaagin shaqaalaha inay doonaan inay wax ka ogaadaan oo ay kala hadlaan hogaanka ilaalinta loo igmaday (DSL) hadii ay walaac ka qabaan ilmaha. Waxaa sidoo kale muhiim ah in shaqaaluhu ogaadaan sida ugu wanaagsan ee xidhiidh kalsooni leh loola yeelan karo caruurta iyo dadka dhalinyarta ah oo fududaynaysa xidhiidh.

[4] Macluumaadka faahfaahinaya qiimaynta sharcga waxaa uu ku jiraa Cutusbka Ka Wada Shaqaynta Ilaalinta Caruurta

## Waxa ay tahay in shaqaalaha dugsiga iyo kuleejku ay raadiyaan

### Caawimaad hore

20. **Ilmo** kasta ayaa kafaa'iidi kara caawimaad hore, laakiin dhamaan shaqaalaha dugsiga iyo kuleejku waa inay si gaar ah uga feejignaadaan baahida imaan karta ee laxariirta in caawimaad hore lasiiyo ilmaha:

- laxaad la' ama qaba xanuunada qaar oo qaba baahiyo dheeraad ah oo gaar ah
- qaba baahiyo waxbarasho oo gaar ah (hadii ay leeyihiin iyo hadii kaleba Qorshaha Waxbarashada, Caafimaadka iyo Daryeelka sharciga ah)
- qaba baahiyo caafimaad oo maskaxda ah
- ah daryeele dhalinyaro ah
- muujinaya calaamado ka dhax bax dadka ama habdhaqan danbiile, oo ay ku jiraan ku biirid gaangis iyo la shaqaynta danbiyada lasoo abaabulay ama khadka degmada
- si joogto ah uga maqan/maqnaada daryeelka ama guriga
- khatar ugu jira adoonsiga casriga ah, tahriibin, ka faa'idaysi jinsi ama danbi
- khatar ugu jira in uu noqdo xagjir ama laga faa'idaysto
- leh xubno qoys oo ku jira jeel, ama ay saamayn ku yeesheen danbiyada waalidku
- ay xaalada qoysku ku keentay caqabad ilmaha, sida balawadaha mukhaadaraadka iyo khamrida, mushkilada caafimaadka maskaxda dadka waawayn ah iyo tacadi guriga dhaxdiisa ah
- leh laftiisu balwado khamri iyo mukhaadaraad
- ku noqday guriga qoyskiisa si ay u hayaan
- khatar ugu jira tacadiga 'sharafta qoyska' ee sida Gudniinka Hablaha ama Qasab Ugu Guurin
- ah ilmo si gaar ah loo korsado, ama
- Uu si joogto ah uga maqan yahay waxbarashada, ayna ku jiraan maqnaanshiyaasha joogtada ah ee qayb kamid ah maalinta dugsiga.

### Xadgudubka iyo dayacaada

21. **Dhamaan** shaqaaluhu waa inay la socdaan ishaarooyinka tacadiga iyo dayacaada (ka eeg kor), fahmaan in caruurtu ay khatar ugu jiri karto waxyeelo gudaha iyo banaanka dugsiga/kuuliyada, guriga iyo banaanka guriga iyo onleyn. In la yeesho bacda xirfadle oo la ogaado waxa ay tahay in la eego taas oo muhiim u ah ishaarooyinka hore ee tacadiga iyo dayacaada si markaa shaqaaluhu ay u ogaan karaan kiisaska caruurta ee u baahan kaalmo ama ilaalin.

22. **Dhamaan** shaqaalaha dugsiga iyo kuleejku waa inay ogaadaan in arimaha xadgudubka, dayacaada iyo ilaalinta ilmuhu ay yihiin dhacdooyin keli ah aynsan kuligood lagu koobi karin hal qeexitaan ama calaamad. Inta badan, arimo badan ayaa midba midka kale abuurayaa.

23. Dhammaan shaqaalaha, laakiin si gaar ah hogaanka u xilsaaran badbaadada (iyo ku xigeenadooda) waa inay ka fiirsadaan in carruurtu khatar ugu jiraan xadgudub ama ka faa'iidaysi lagu sameeyo intay ku jiraan xaaladaha ka baxsan qoysaskooda. Waxyeelo dheeraad ah oo qoyska oo noocyo kala duwan ah oo caruurta waxay u nuglaan karaan waxyeelooyin kala duwan oo ay ku jiraan (laakiin kuma xadidna) tacadiga galmo (waxaa ku jira hanjabaad iyo ka faa'idaysi), tacadiga guriga



Find this document and other translations of Part 1 and Annex A of
Keeping Children Safe in Education in 13 community languages at kcsietranslate.lgfl.net

dhaxdiisa ee xidhidhkooda gaarka ah (tacadiga xidhiidhka dhawr iyo toban jirada ah), ka faa'idaysiga danbi, ku xad gudubka dhalinyarta ee daran, khadka degmada iyo xad jirnimo.

24. **Dhammaan** shaqaaluhu waa inay la socdaan in tignooloojiyadu ay qayb wayn ka tahay ilaalinada badan ee badqabka iyo faya dhawrka. Caruurtu waxay khatarta ugu jirtaa tacadiga iyo khataraha kale ee onlaynka ah iyo sidoo kale foolka-fool. Marar badan tacadiga iyo khatarta kale waxay u dhacaan u soo noqnoqta onleyn iyo ofleyn labadaba. Caruurtu iyaga ayaa sidoo kale onleyn ahaan isku tacadiya, tani waxay u dhacdaa fariimo tacadi, hanjabaad iyo dhaqan xumo/nacayb ah, in iyada oo aan la ogolayn qofka lala wadaago sawiro aan wanaagsanayn, gaar ahaan kooxaha wada sheekeysiga, iyo in lala wadaago sawiro iyo muuqaalo qaaqaawan, kuwa aan doonaynin inay helaan waxyaabaha noocaas ah.

25. **Markaa, hadii ay shaqaaluhu ka shakiyaan, waa inay kala hadlaan hogaanka ilaalinta loo igmaday ama ku xigeenkiisa.**

### Muujiyayaasha tacadiga iyo dayacaada

26. **Xadgudub:** waa nooc kamid ah si xun ula dhaqanka ilmaha. Qof ayaa kuxadgudbi kara ilmo ama dayici kara asagoo usababaaya khatar ilmaha kudhacda ama kufashilmaaya talaabadii uu uga difaaci lahaa khatarta. Waxyeelada waxaa kamdi noqon kara si xun ula dhaqan aan jidh ahaan iyo sidoo kale saamaynta araga si xun ula dhaqanka dadka kale. Tani waxay si gaar ah ula xidhiidhaa, tusaale ahaan, xidhiidhka saamaynta ku hel caruurta ee dhamaan noocyada tacadiga guriga dhaxdiisa ah. Caruurta waxaa xad gudub loogu gaysan karaa qoys ama xarun waxbarasho ama xarun bulsho waxaana kuxad gudbi kara dadka ilmuhu yaqaanaan ama, marar dhif ah, dad kale. Xad gudubka ayaa kadhici kara gabi ahaanba khadka oonleenka, ama farsamada casriga ah ayaa loo adeegsan karaa fududaynta xad gudub aan oonleen ahayn. Caruurta waxaa ku xadgudbi kara qof wayn ama dad waawayn ama ilmo kale ama caruur kale.

27. **Xad gudubka jirka ah**: waa nooc kamid ah xad gudubka kaasoo ay kujiri karaan nabar kudhufasho, hantaaturayn, tuuris, sumayn, gubid ama wax kulul uridis, biyo kuquusin, naqas kudhajin ama hadii kale dhibaato loo gaysto jirka ilmaha. Dhibaataynta jirka ayaa sidoo kale imaan karta marka waalid ama qof daryeele ah uu buunbuuniyo, ama si kas ah ugu rido, xanun ilmaha.

28. **Xad gudubka dareenka**: niyad kadilka ilmaha ee joogtada ah sida in lagu abuuro saamayno daran oo xun kobaca dareen ee ilmaha. Waxaa kujiri kara in ilmaha loogu celceliyo inuu uahay mid nacas ah ama aan cidna jeclayn, aan wax kutoornayn, ama kaliya ay qiimo uleeyihiin sabab laxariirta inay baahida qofkale buuxshaan. Waxaa kujiri kara inaan ilmaha lasiin fursado uu ku sheego waxa uu dareemaayo, in si gardaro ah looga xiro hadalka ama 'lagu shactiraysto' waxa uu sheego ama sida uu uhadlo. Waxaa kujiri kara in himilooyin aan kuhaboonayn da'da ama heerka kobaca ee ilmaha kuwaasoo lagu tartarsiiyo caruurta. Waxaa kuwaan kamid noqon kara isdhexgal uusan ilmuhu gaarin marka laga fiirsho awoodiisa kobac iyo sidoo kale difaac xad dhaaf ah iyo in laxakameeyo waxyaabaha ay daawan karaan iyo waxbarashadooda, ama il ilmaha laga hor istaago kaqaybgalka isdhexgalada caadiga ah ee bulshada. Waxaa kujiri kara araga ama maqalka sida xun ee loola dhaqmay ilmo kale. Waxay noqon kartaa xoog usheegasho daran (ayna kujirto hanjabaada laysku mariyo internetka) taasoo kenaysa in caruurtu si joogto ah udareemaan cabsi ama inay halis kujiraan, ama in lasasabto ama lakhiyaano caruurta. Qaar kamid ah heerka xad gudubka dareenka ayaa laxariira dhamaan noocyada si xun ula dhaqanka xaruurta, inkastoo ay kaligeed dhici karto.

29. Xad gudub dhanka galmada ah: wuxuu laxariiraa kuqasbida ama kucadaadinta ilmo ama qof da'yar inuu qayb kanoqdo falal galmo ah, ayadoon laga fiirin inay kujirto rabshad, ayadoon

laga eegayn in ilmuhu ogyahay waxa dhacaaya. Falalka waxaa kujiri kara taabasho jireed, ayna kujirto weerar laxariira in ilmaha wax lagasho (tusaale ahaan kufsi ama galmada afka) ama falalka aan ahayn wax galinta sida siigaysiga, shuinta, istiiminta iyo taabashada dusha laga taabto asagoo dhar qaba. Waxaa sidoo kale kujira falalka aan taabashada lahayn, sida in ilmaha laga qaybgaliyo fiirsashada, ama soosaarista, sawirku galmo ah, daawashada muuqaalada galmada, kudhiiri galinta caruurta inay udhaqmaan qaab galmo ahaan khaldan, ama udiyaarinta ilmaha si aad xad gudub ugu samayso. Xad gudubka galamada ayaa kadhici kara khadka oonleenka, farsamada casriga ah ayaana loo adeegsan karaa fududaynta xad gudub aan oonleen ahayn. Xad gudubka galmadu maaha mid ay kaliya sameeyaan rag waawayn. Haweenka ayaa sidoo kale gali kara xad gudub galmo, si lamid ah sida ay usamayn karaan caruurta kale. Tacadiga galmada caruurtu caruurta kale kula kacdo waxaa weeye mushkilad ay tahay in laga ilaaliyo ee waxbarashada oo **dhamaan** shaqaaluhu waa inay la socdaan oo siyaasada dugsiga ama kuuliyada iyo nidaamyada arrintaas ka hadlaya.

30. **Dayacaada:** waa fashilka joogtada ah ee ku aadan buuxinta baahiyaha aasaasiga ah ee jireed iyo/ama maskaxeed ee caruurta, taasoo ay ubadan tahay inay abuurto naafo ba'an oo gaarta caafimaadka ama kobaca ilmaha. Dyaca ayaa dhici kara intay hooyadu uurka leedahay, tusaale ahaan, sabab laxariirta in hooyadu cabi jirtay waxyaabaha maandooriyaasha ah. Marka ilmuhu dhasho, dayacaada ayaa noqon karta mid katimid waalid ama daryeele kufashilma inuu: uu siiyo ilmaha cunto kufilan, dhar iyo hooy (ayna kujiraan in ilmaha laga saaro guriga ama la iskaxooro); inuu kadifaaco ilmaha dhibaatada ama khatarta jireed iyo mida dareenka; inuu xaqiijiyo kawarqabid kufilan (ayna kujirto adeegsiga daryeelayaal aan ilmaha baahiyihiisa kufilnayn); ama inuu xaqiijiyo helitaanka daryeelka caafimaad ama daawada kuhaboon imaha. Waxaa sidoo kale kujiri kara dayacaada, ama inaan qofku kajawaabi karin, baahiyaha aasaasiga ah ee dareenka ilmaha.

## Arimaha ilaalinta ilmaha

31. **Dhamaan** shaqaaluhu waa inay kwarqabaan arimaha ilaalinta kuwaasoo ilmaha galin kara halis ah in dhibaato gaarto. Habdhaqanada la xidhiidha mushkiladaha sida mukhaadaraad qaadasho iyo/ama cabitaanka khamrida, si ula kac ahaan uga maqnaanshaha waxbarashada, xad gudubyada daran (oo ay ku jiraan kuwa la xidhiidha khadka degma), xag jirnimo iyo wadaagista muuqaalada iyo/ama sawirada[5] qaaqaawan ogolaanshe iyo ogolaanshe iyada oo aan laga haysan qofka ayaa noqon kara calaamdaaha in ilmuhu ku jiro khatar. Hoos waxaa ku jira qaar kamid ah mushkilada ilaalinta ee dhamaan shaqaaluhu ay tahay inay ogaadaan. **Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mushkiladaha ilaalinta iyo macluumaadka mushkilada kale ee ilaalinta waxaa lagu daray jaantuska.**

### Tacadiga ilme-ilme kale kula kaco

32. **Dhamaan** shaqaaluhu waa inay la socdaan in caruurta ay tacadi caruurta kale kula kaci karto (taas oo badanaa loo yaqaan tacadiga ilme-ilme kale kula kaco), oo ay ka dhici karto gudaha iyo banaanka dugsiga maa kuuliyada iyo onleyn. **Dhamaan** shaqaaluhu waa inay u cadaato siyaada iyo nidaamka dugsiga ama kuuliyada ee ku saabsan tacadiga ilme-ilme kale

[5] Wadaagista dhinacyadu isla aqbaleen ee sawirada, gaar ahaan kuwa ay wadaagaan carruurta roon-roon ee isku da'da ah, ayaa u baahan karta jawaab gaar ah. Waxaa laga yaabaa inaysan ahayn xadgudub – laakiin carruurtu waa inay wali ogaadaan inay tahay sharci daro- halka wadaagista aan qofka kale ogolaan ay tahay sharci daro iyo xadgudub. UKCIS wxay talo faahfaahsan ka bixinaysaa wadaagista sawirada iyo muuqaallada qaawan ama qayb ahaan qaawan.

kula kaco iyo kaalinta muhiimka ah ay ka ciyaarayaan kahortaga iyo ka jawaabida marka ay u arkaan in iluhu uu khatar ugu jiro.

33. **Dhamaan** shaqaaluhu waa inay fahmaan in xataa hadii aan lasoo gaadhsiinin dugsigooda ama kuuliyadooda kama dhigna inayna dhicin, waxaa dhici karta in aan kaliya la sheegin uun. Waxaa muhiim ah in hadii shaqaalaha ay qabaan **wax** walaac ah oo ku saabsan tacadiga ilme-ilme kale kula kaco inay kala hadlaan hogaanka ilaalinta loo igmaday (ama ku xigeenkiisa).

34. Waxaa daruuri ah in **dhamaan** shaqaaluhu ay fahamaan muhiimiyada caqabadaha habdhaqanka aan munaasabka ahayn ee u dhaxeeya caruurta, qaar badan oo badan oo kamid ah waxay ku qoran yihiin hoos, kuwaas oo ah tacadi. Iska indho irista habdhaqannada qaar, tusaale iska indho tirista dhibaataynta galmoo lagasoo qaado "keliya kaftan", "keliya shactiro", "qayb kamid ah koriimada" ama "wiil markasta waa wiil" ay abuurayso caadi ka dhigista habdhaqanno aan la aqbali karin, goob aan badqab u lahayn carruurta mararka ugu xunna dhaqan caadi ka dhigaaya xadgudubka taasoo keenaysa in carruurtu u qaataan wax caadi ah aysana ku dhiiran inay soo sheegaan.

35. Tacadiga ilme-ilme kale kula kaco waxay u badan taahy inay kamid noqdaan, laakiin kuma koobna:

- gardaraysiga (ay kamid tahay gardaraysiga internetka dhaxdeeda, wax cuqdad ka kacay iyo gardaraysiga takoorka)
- tacadiga xidhiidhka jacayl ee shakhsi ahaaneed ee u dhaxeeya caruurta (mararka qaar loo yaqaan 'tacadiga xidhiidhka dhawr iyo toban jirada')
- tacadiga jidhka sida wax ku dhufasho, laadig, gilgilid, garaac, timo jiidid, ama waxyeelo kale oo jidh (waxaa kamid noqon kara shayo onleyn ah oo fududayn kara, waxyeeli kara iyo/ama horseedi kara tacadi jidh)
- tacadiga galmada,[6] sida kufsiga, tacadi gelin iyo tacadi galmo; (waxaa kamid noqon kara shayo onleynka ah oo fududaynaya, gelinaya khatar iyo/ama dhiiri gelinaya dagaal galmo)
- tacadiga galmada,[7] sida faalada galmo, ka hadalka, kaftanka iyo handadaad galmo oo onleynka ah, kuwaas oo gooni ah ama qayb ka ah qaab tacadi oo balaadhan
- oo ku keena qof inuu sameeyo hawlo galmo isaga oo aan ogoladayn, sida in qof lagu khasbo inuu dharka iska saaro, u taabasho qaab galmo qof, ama in uu la sameeyo galmo cid kale
- wadaagida sawiro iyo/ama fiidyawyo qaawaawan ama qayb qaaqan iyada oo la ogol yahay ama aan la ogolayn[8] (sidoo kale loo yaqaan fariimaha galmada ama sawirada galmada ee dhalinyartu samayso)
- dharka hoostiisa,[9] taas oo caadiyan ah in qofka sawir laga qaado dharkiisa hoostiisa isaga oo aan ogolaanin, iyada oo lagu doonayo in lagu eego xubinta taranka ama dabada si looga helo qaab raaxo galmo, ama in qofka dhibanaha ah lagu bahdilo, lagu warwariyo ama loo geliyo buuq, iyo
- Abuurista/bilaabida nooc rabshad ama saansaanteeda (tan waxaa ku jiri kara falalka la xariira dhibaataynta, xadgudubka ama bahdilaada loo adeegsado qaab qfka loogusoo daro koox waxaana sidoo kale ku jiri kara waxyaabaha oonleenka ah).

---

[6] Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan tacadiga galmada ka eeg Qaybta 5 ee waraaqaha oo dhan iyo Jaantuska..
[7] Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan handadaada galmada ka eeg Qaybta 5 ee waraaqaha oo dhan iyo Jaantuska.
[8] Tilmaamaha UKCIS: Sharing nudes and semi-nudes advice for education settings (Talllada wadaagista sawirada qaawan ama qayb ahaan qaawan marka la joogo xarumaha waxbarashada)
[9] Wixii macluumaad dheeraad ah ee 'dharka hoostiisa ah', ka eeg Jaantuska.

### Ka faa'iidaysiga La xariira Galmada (CSE) iyo U adeegsiga Ilmaha Fal Danbiyeed (CCE)

36. Labadaba CSE iyo CCE waa qaabab xadgudub oo dhaca marka qof ama koox ay ka faa'iidaystaan kala saraynta awooda si ay ugu qasbaan, u marin habaabiyaan ama u khiyaameeyaan ilmo si uu uga qaybgalo fal galmo ama danbi, si uu ugu badasho wax dhibanuhu u baahan yahay ama doonaayo, iyo/ama faa'iidada dhaqaalaha ama darajo kordhinta diyaariyaha ama fududeeyaha iyo/ama si xoog ah ama hanjabaad xoog u sheegasho ah. CSE iyo CCE ayaa saamayn kara carruurta, lab iyo dhedig ba waxaana ku jiri kara carruurta lasoo dhoofiyay (oo caadiyan loogu yeero dad dhoofin) si looga faa'iidayso.

### Uga faa'iidaysiga Carruurta Falalka Danbiga ah (CCE)

37. Noocyo qaar ee CCE waxaa kamid ah in caruurta lagu qasbo ama lagu siyaasadeeyo inay mukhaadaraad ama lacag cid ugu wareejiyaan khadka degmada, inay ka shaqeeyaan warshad mukhaadaraad, inay tukaan wax ka xadaan, ama inay cid jeeb siibaan. Waxaa sidoo kale lagu qasbi karaa ama lagu dagi karaa inay galaan fal danbiyeedka gaariyaasha ama ku hanjabida/samaynta rabshad xun oo ka dhan ah dadka kale.

38. Caruurta ayaa ku dhax xanibmi kara noocyadan ka faa'idaysiga, maadaama oo danbiiluhu uu ugu hanjabi karo dhibanaha (iyo qoysaskooda) inay waxyeeli doonaan ama inay ku xanibaan oo ay ku dirqiyaan dayn lagu leeyahay. Waxaa lagu qasbi karaa inay qaadaan hub sida mindiyo ma inay bilaabaan qaadashada mindi si ay u siiso dareen difaac ay ka helaan wayeelo kasoo gaarta dadka kale. Ayadoo carruurta qaybta ka ah ka faa'iidaysiga fal danbiyeedyada ay badanaa galaan danbiyo, nugaylkooda ka dhibanayaal ahaan maaha wax markasta ay aqoonsadaan dadka waawayn iyo xirfadlayaashu, (gaar ahaana carruurta roon-roon), loolamana dhaqmo iny yihiin dhibanayaal inkastoo ay waxyeelo ku dhacayso. Wali waxaa looga faa'iidaysan karaa fal danbiyeedyada xataa haddii falku u muuqdo wax ilmuhu aqbaleen ama ay doonayaan.

39. Waa muhiim in la ogaado in khibrada ay maraan gabdhaha falalka danbiga loo adeegsaday ay aad uga duwanaan karto wiilasha. Calaamadaha ayaa kala duwanaan kara, hase yeeshee xirfadlayaashu waa inay ogaadaan in gabdhaha loo adeegsan karo falalka danbiga sidoo kale. Sidoo kale waa muhiim inay ogaadaan in labadaba wiilasha iyo gabdhaha loo adeegsaday fal danbiyeedku y khatar dheeraad ah ugu jiran in looga faa'iidaysto falalka galmada.

### Uga faa'iidaysiga Carruurta Falalka galmada ah (CSE)

40. CSE waa qaab kamid ah xadgudubka galmada ilmaha. Xadgudubka galmada waxaa kujiri kara taabasho jireed, ayna kujirto weerar laxariira in ilmaha wax lagasho (tusaale ahaan kufsi ama galmada afka) ama falalka aan ahayn wax galinta sida siigaysiga, shuinta, istiiminta iyo taabashada dusha laga taabto asagoo dhar qaba. Waxaa sidoo kale kujira falalka aan taabashada lahayn, sida in ilmaha laga qaybgaliyo samaynta sawirada galmada, ku qasbida ilmaha inay fiirshaan sawirada galmada ama ay daawadaan muuqaallada galmada, kudhiiri galinta caruurta inay udhaqmaan qaab galmo ahaan khaldan, ama udiyaarinta ilmaha si aad xad gudub ugu sameeyaan ayna ku jirto kan dhanka interneedka.

41. CSE waxa uu dhici karaa mudo ama waxa uu dhici karaa hal mar oo waxa uu dhici karaa iyada oo aanu ilmuhu ogayn tusaale ahaan in muuqaal ama sawiro lagula wadaago baraha bulshada.

42. CSE waxay saamayn kartaa ilmo kasta oo lagu qasbay inay sameeyaan hawlo galmo. Waxaa kamid ah 16- iyo 17- sano jir waxa uu si sharci ah u ogolaan karaan galmada. Caruurta

qaar waxaa dhici karta inayna garanin in laga faa'idaystay tusaale ahaan waxay u arkaan inay xidhiidh jacayl la leeyihiin.

### Tacadiga Guriga Dhaxdiisa

43. Tacadiga guriga dhaxdiisa waxa uu keeni karaa habdhaqano kala duwan oo waxa uu noqon karaa dhacdo kaliya ama dhacdooyin joogto ah. Tacadigu waxa uu noqon karaa, laakiin kuma xadidna, maskixiyan, jidh, galmo, dhaqaale ama dareen. Caruurta ayaa u noqon kara dhibane tacadiga guriga dhaxdiisa. Waxay arki, maqli ama dareemi karaan saamaynta tacadiga guriga oo/ama waxay la kulmi karaan tacadiga guriga dhaxdiisa ee xidhiidhka jacayl (tacadiga xidhiidhka dhawr iyo toban jirada). Dhamaan kuwaas oo ku yeelan kara saamayn mudo dheer ah caafimaadkooda, badqabkooda, korniinkooda, iyo awoodooda waxbarasho.

### Gudniinta Gabdhaha ee Fircooniga ah (FGM)

44. Inkasta oo **dhamaan** shaqaalaha ay tahay inay kala hadlaan hogaanka ilaalinta loo igmaday (ama ku xigeenkiisa) wixii ku saabsan walaacyada gudniinka dumarka (FGM), waxaa jira **masuuliyado sharci oo saaran macalimiinta** oo gaar ah..[10] Hadii macalin, asagoo kujira shaqada xirfadiisa, uu ogaado in talaabo dhanka FGM ka ah lagu sameeyay gabar kayar da'da 18 sano jir, macalinka waxaa **qasab ku ah** inuu arintaan kuwargaliyo booliiska.

### Caafimaadka Dhimirka

45. **Dhammaan** shaqaaluhu waa inay ka warqabaan in dhibaatooyinka caafimaadka dhimirku ay, mararka qaar, noqon karaan calaamad muujinaysa in cunug uu la ildaran yahay ama khatar ugu jiro inuu la ildarnaado xadgudub, dayacaad ama ka faa'iidaysi lagu sameeyay.

46. Kaliya shaqaalaha sida saxda ah loo tababaray ayay tahay inay isku dayaan baarida cilad dhanka caafimaadka dhimirka ah. Hase yeeshee, shaqaalaha waxbarashadu, waxay fursad fiican u haystaan inay la socdaan carruurta maalin kasta ayna aqoonsadaan ilmaha dabeecadiisu muujinayso inuu waajahaayo cilad dhanka caafimaadka dhimirka ah ama khatar ugu jiro inuu cilad waajaho. Dugsiyada iyo kuleejyada ayaa heli kara talooyin badan oo ka caawinaaya aqoonsiga carruurta u baahan taageerada dheeraadka ah ee caafimaadka Maskaxda, tan waxaa ku jira la shaqaynta wakaalado dugsiga ka baxsan.

47. Haddii shaqaaluhu walaac caafimaadka dhimirka ah ka qabaan cunug taasoo sidoo kale walaac dhanka badqabka ah, talaabo degdeg ah waa in la qaadaa, ayagoo raacaaya xeerkooda difaaca carruurta ayna la hadlaan hogaanka badbaadada ee ku shaqada leh ama ku xigeenkiisa.

### Rabshad daran

48. **Dhamaan** shaqaaluhu waa inay la socdaan calaamadaha, oo ay dhici karto inay kamid yihiin calaamadaha caruurta ee khatarta ugu jirta, ama dhici karta inay ku lug leeyihiin, danbi aad u wayn. Waxaa kamid noqon kara ka maqnaanshaha badan ee dugsiga ama kuuliyada, isbadalka asxaabta ama xidhiidh dad waawayn ama koox, hoos u dhac wayn oo waxbarashada

---

[10] Sida kucad Qaybta 5B(11) (a) ee Sharciga Gudniinka Gabdhaha 2003, "macalin" waxaa laga wadaa, marka laga fiirsho sharciga England, qof kujira farqada 141A(1) ee Sharciga Waxbarashada 2002 (shaqsiyaadka loo shaqaalaysiiyay ama qaybta ka ah fulinta shaqada macalinimada oo ay wax kubaraan dugsiyada iyo xarumaha kale ee waxbarasho ee kuyaala England)..

ah, calaamado waxyeelo nafta ah ama isbadal wayn oo badqabka ah, ama calaamado dagaal ama dhaawacyo aan la garanaynin waxa keeney. Hadyado aan la garanaynin cida laga heley ama haysasho alaabaad cusub ayaa sidoo kale noqon kara in caruurta ay u yimaadeen, ama ay la shaqeeyaan, shakhsiyaad danbiyo faraha kula jira oo ka tirsan dalad danbi ama gaangis oo waxaa dhici karta inay ku jiraan khatar ka faa'idaysi.

### mACLUUMAAD DHEERI AH IYO TAAGEERO

49. Talada waaxda Waxa La Samaynayo Hadii Aad Ka Warwarsan Tahay Ilme In Lagu Tacadiyayo - Talada Xirfadlaha waxaa laga helayaa macluumaad dheraad ah oo ku saabsan fahanka iyo ogaanshaha tacadiga iyo dayacaada. Tusaalayaasha waxyaabaha ay ubadan tahay inay muujiyaan xad gudub iyo dayacaad ayaa si kooban loogu sheegay dhamaan talada waxayna si gaar ah ucaawinayaan shaqaalaha dugsiga iyo kuleejka. Websaytka NSPCC sidoo kale waxa uu bixiyaa macluumaad dheeraad ah oo wax ku ool ah oo ku saabsan tacadiga iyo dayacaada iyo waxa ay tahay in la eego.

50. **Jaantuska waxaa kamid ah macluumaad dheeraad ah oo muhiim ah oo ku saabsan noocyada gaarka ah ee tacadiga iyo mushkiladaha ilaalinta. Hogaamiyaasha dugsiga iyo kuleejka iyo shaqaalaha sida tooska ah ugu shaqeeya caruurtu waa inay akhriyaan liiska.**

## Waxa ay samaynayaan shaqaalaha dugsiga iyo kuleejku haday walaacyo kaqabaan ilmo

51. Shaqaalaha u adeegaaya caruurta waxaa lagu boorinayaa inay diirada saaraan fikirka ah '**way kadhici kartaa halkaan**' marka arintu laxariirto amaanka ilmaha. Markay walaac kaqabaan badqabka ilmo, shaqaaluhu waa inay markasta qaadaan talaabada **ugu haboon** ee maslaxada ilmuhu kujirto.

52. Hadii shaqaaluhu **wax walaaca** kaqabaan badqabka ilmaha, waa inay talaabo **degdeg ah kaqaadaan.** Kafiiri bogga 22 shaxda isku aadka ah taasoo sheegaysa hanaanka ay racayaan shaqaaluhu marka ay walaac kaqabaan ilmo.

53. Hadii shaqaaluhu ay qabaan walaac, waa inay raacaan siyaasada ilaalinta hay'adppda oo waa inay kala hadlaan hogaanka ilaalinta loo igmaday (ama ku xigeenkiisa).

54. Dookhyada ayaa intaas kadib noqon kara:

- maamulida wixii taageero ah ee ilmaha gudaha dugsiga ama kuuliyada ee nidaamkooda taageero u gaarka ah
- samaynta qiimaynta kaalmo ee hore,[11] ama
- wargalin loodiro adeegyada sharciga ah,[12] tusaale ahaan marka ilmuhu baahi qabo, uu baahi kujiro ama la ildaran yahay ama ay ubadan tahay inuu ladhibaatoonaayo khatar kudhacday.

---

[11] Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qiimaynta kaalmada hore, bixinta adeegyada kaalmada hore iyo adeegyada gelitaanka waa ay ku yaalaan Cutubka 1 ee Ka Wada Shaqaynta  Ilaalinta Caruurta.
[12] Cutub 1 ee Ka Wada Shaqaynta Ilaalinta Caruurta waxaa lagu sheegey qaabka ilaalinta ee lagu baahiyay waraaqaha macluumaadka oo muujinaya shuruudaha, oo ay ku jiraan heerka baahiyaha, wakhtiga kiiska ay tahay in

55. Hogaanka ilaalinta loo igmaday (ama ku xigeenkiisa) waa inay mar kasta diyaar u noqdaan ka hadalka wixii walaacyo ah ilaalin. Hadii ay jiraan xaalado gaarka ah, hogaanka ilaalinta loo igmaday (ama ku xigeenkiisu) aanay joogin, waa inayna ku iman dib u dhac talaabada munaasabka ah ee la qaadayo. Shaqaaluhu waa inay la hadlaan xubin kamid ah kooxda maamulka sare iyo/ama ay talo waydiiyaan daryeelka bulshada caruurta maamulka deegaanka. Xaaladahan oo kale, wixii talaabo ah ee la qaaaday waa in lala wadaagaa hogaanka ilaalinta loo igmaday (ama ku xigeenkiisa) sida ugu dhakhsaha badan ee macquulka ah.

56. Shaqaaluhu waa inay kafakarin in xubin shaqalaaha kamid ah ama xirfadle kale uu qaado talaabo uuna lawadaago macluumaad muhiim u ah badbaadinta nolosha caruurta. Waa inay niyada ku hayaan in wadaagista xogta xili hore ay muhiim u tahay aqoonsiga, qiimaynta, iyo qoondaynta waxtarka leh ee bixinta adeegga ku haboon, hadday tani tahay marka koobaad ee ciladu soo muuqato, ama marka ilmo horay u yaqaaneen maamulka maxaliga ah ee daryeelka bulshada ee carruurta (sida ilmo u baahan ama ilmo leh qorshaha difaaca). [Wadaagista Macluumaadka: Talada Xirfadlayaasha Siiya Adeegyada Ilaalitna Caruurta, Dadka Dhalinyarta ah, Waalidiinta iyo Daryeelayaasha]() shaqaalaha taageerada ee go'aanka gaadhay ku saabsan wadaagista macluumaadka. Taladaan waxaa kujira todobada xeer ee muhiimka u ah wadaagista macluumaadka iyo kabaaraan dagisyada ku aadan Sharciga Difaaca Macluumaadka 2018(DPA) iyo Xeerka Guud ee Difaaca Macluumaadka (UK GDPR).

57. DPA iyo UK GDPR **ma** baajiyaan wadaagista macluumaadka wixii ujeedo ah ilaalinta caruurta amaankooda iyo kor u qaadida badqabkooda. Hadii ay jiraan wax shaki ah oo ka jira macluumaadka, shaqaaluhu waa inay kala hadlaan hogaanka ilaalinta loo igmaday (ama ku xigeenka). Cabsiyada ku aadan faafinta macluumaadku **waa qasab inaan** loo ogolaan nay caqabad kunoqoto baahida looqabo ilaalinta iyo hormarinta faya dhawrka carruurta.

## Qiimaynta kaalmada hore

58. Hadii kaalmada hore ay ku haboon tahay, hogaanka ilaalinta u igmaday (ama ku xigeenka) waxay caadiyan u hogaamin doontaa wakiilka hay'adaha kale iyo habdhismeedka ee qiimaynta gudaha hay'ada sida ay ku munaasab tahay. Shaqaalaha waxaa laga don karaa inay taageeraan shaqaalaha kale iyo xirfadlayaasha kale inta lagu jiro qiimaynta caawimaada hore, ayagoo mararka qaar noqon kara hogaanka qiimaynta. Markan oo kale waa in si joogto ah loo qiimeeyaa oo la eegaa in loo gudbiyo daryeelka bulshada caruurta maamulka deegaanka si ay ugu sameeyaa qiimaynta adeegyada sharciga hadii xaalada ilmuhu ayna kasoo raynin ama ay kasii darto.

## Qiimaynnada iyo adeegyada sharciga ah ee daryeelka bulshada ee carruurta

59. **Marka ilmuhu uu dhiban yahay, ama ay u badan tahay inay soo gaadho waxyeelo, waxaa muhiim ah in loo gudbiyo daryeelka bulshada caruurta maamulka deegaanka (iyo hadii ay ku munaasab tahay bilayska) isla markaba**. Wargalinadu waa inay racaan hanaanka wargalinta ee maxaliga ah.

---

loo gudbiyo daryeelka bulshada caruurta maamulka deegaanka ee qiimaynta iyo adeegyada sharciga ee hoos yimaada qaybta 17 iyo 47. Sarakiisha dawlada deegaanka, oo kaashanaaya iskaashatadooda, waa inay abuuraan ayna soo dhajiyaan maamus maxali ah oo lagu samaynaayo qiimaynta. Maamuuska maxaliga ah waa inuu dajiyaa nidaamyo qeexan oo ku aadan qaabka kiisaska loo maaraynayo marka ilmaha loosoo gudbiyo maamulka deegaanka ee daryeelka arimaha bulshada ee caruurta.

60. Qiimaynta daryeelka bulshada ee caruurta ee deegaanka waa in lagu eegaa halka caruurta lagu waxyeeleeyay marka la eego banaanka guriga, markaa waxaa muhiim ah in dugsiyada iyo kuuliyaduhu ay bixiyaan macluumaadka ugu badan ee macquulka ah oo ka qayb ah nidaamka gudbinta. Tani waxay usahlaysaa qiimayn kasta inay xisaabta kudarsato dhamaan cadaynta laheli karo waxayna fududaynaysaa qaab naqshadaysan oo loo xaliyo dhibaatadaas. Xog dheeraad ah ayaad ka helaysaa halkaan: Contextual Safeguarding (Ilaalinta Ilmaha kabaxsan Dugsiga).

61. Agabka onleynaka ah Report Child Abuse to Your Local Council (Wargelinta Tacadiga Ilmaha ee Golaha Deegaanka) laga helayaa lambarka lagala xidhiidhayo daryeelka bulshada caruurta maamulka deegaanka ee ay khusayso.

### Caruurta baahida qaba

62. Ilmo baahi qaba waxaa lagu qeexay Sharciga Caruurta ee 1989 inuu yahay ilmo ay ubadan tahay inuusan kuguulaysan karin ama haysan karin heerka macquulka ah ee caafimaadka ama kobaca, ama caafimaadkiisa iyo kobaciisu ay ubadan tahay in si wayn ama si dheeri ah dhaawac usoo gaaro, hadaan lasiin adeegyada; ama ilmo naafo ah. Maamulka deegaanka waxaa laga doonayaa inay siiyaan adeegyada caruurta baahida qaba sababo laxariira ilaalinta badqabkooda iyo hormarinta faya dhawrkooda. Caruurta baahida qabta waxaa lagu qiimayn karaa si waafaqsan farqada 17 ee Sharciga Caruurta 1989.

### Caruurta la ildaran ama ay ubadan tahay inay la ildarnaadaan dhibaato daran:

63. Maamulka deegaanka, oo kaashanaaya ururada kale ee hawshaani qusayso, waxaa masuuliyad kasaaran tahay baaritaan kusameeyaan si waafaqsan farqada 47 ee Sharciga Caruurta 1989 haday hayaan cadayn macquul ah oo ay uga shakiyaan in ilmo yar xaalad xun kujiro, ama laga yaabo inuu la dhibtonaayo, dhibaato wayn. Xog aruurintaas ayaa u sahlaysa inay go'aanshaan inay qaadaan iyo in kale wax talaabo ah si loo ilaaliyo badqabka loona hormariyo faya dhawrka ilmaha waana in loo sheegaa marka ay jiraan walaacyo la xariira ilmo la dac-dareeyay. Waxaa kamid ah **dhamaan** noocyada tacadiga iyo dayacaada.

### Maxay tahay inay sameeyaan maamulka deegaanku?

64. Gudaha hal maalin marka lasoo gudbiyo wargalinta, shaqalaaha arimaha bulshada ee aamulka maxaliga ah waa inuu xaqiijiyaa helitaanka wargalinta uuna go'aan kagaaraa talaabooyinka xigga ee laqaadaayo iyo nooca jawaabta ee loo baaha yahay in labaxsho. Tan waxaa kujirta kago'aan gaarista in:

- ilmaha u baahan ilaalinta dakhsaha ah iyo talaabo degdega ah u baahan
- wixii adeegyo ah ee uu u baahan yahay ilmaha iyo qoyska iyo nooca adeegyada
- in ilmuhu baahi qabo, ayna tahay in qiimayn lagu sameeyo si waafaqsan farqada 17 ee Sharciga Caruurta 1989. Cutubka Working Together to Safeguard Children (Kawada shaqaynta Ilaalinta Caruurta) waxa laga helayaa faahfaahin nidaamka qiimaynta ah
- in ay jirto sabab macquul ah oo looga shakin karo in ilmuhu la ildaran yahay ama ay ubadan tahay inuu ladaalaa dhacaayo dhibaato wayn, iyo in baaritaano ay qasab tahay in lagu sameeyo cunuga lagu qiimeeyo si waafaqsan farqada 47 ee Sharciga Caruurta 1989. Cutubka Working Together to Safeguard Children (Kawada shaqaynta Ilaalinta Caruurta) waxa laga helayaa faahfaahin nidaamka qiimaynta ah,

- in qiimaynada dheeriga ah ee taqasuska leh loo baahan yahay si looga caawiyo maamulka deegaanka go'aaminta nooca talaabada dheeriga ah ee laqaadayo;

65. Wargalinta waa in daba gal lagu sameeyaa hadii macluumaadkaan uu yahay mid biloow ah.

66. Hadii shaqaalaha bulshadu ay go'aansadaan inay sameeyaan qiimaynta sharciga, shaqaaluhu waa inay sameeyaan wax kasta oo ay ku taageeri karaan qiimaynta (waxaa taageera hogaanka ilaalinta loo igmaday (ama ku xigeenkiisa) sida loogu baahdo).

67. Hadii, kadib wargalinta, xaalada ilmuhu aysan umuuqan mid kasoo raynaysa, wargalintu waa inay martaa habraacyada soosocda ee sii balaarinta qadiyada maxaliga ah si loo hubiyo in walaacyada laxaliyo lana, sida ugu muhiimsan, kor looqaado xaalada ilmaha.

## Ilaalinta diiwanaka

68. **Dhamaan** walaacyada, doodaha iyo go'aanada lagaaro, iyo sababaha go'aanadaas loo cuskado, waa in ayagoo qoran diiwaanka lagashaa. Tani waxay sidoo kale ka caawisaa hadii/goorta wax cabasho ah oo ku saabsan qaabka kiiska ay sameeyeen dugsiga ama kuuliyada. Xogtu waa inay ahaataa mid qarsoodi ah meel amaan ahna lagu kaydiyaa. Waa dhaqan wanaagsan in walaacyada iyo soo jeedinnada lagu hayo qayb gaar ah oo galka difaaca ilmaha ah cunug kasta.

Diiwaannada waa in lagu daraa:

- guudmar cad oo dhamaystiran oo ku saabsan walaacyada
- faahfaahinta sida walaacyada loo daba galay ee loo xaliyay, iyo
- Cadaynta talaabo kasta oo la qaaday, go'aannada la gaaray iyo natiijada.

69. Hadii laga shakiyo shuruudaha duubitaanka, shaqaaluhu waa inay kala hadlaan hogaanka ilaalinta loo igmaday (ama ku xigeenka).

## Maxay arimahaan dhan muhiim uyihiin?

70. Waa muhiim in caruurtu helaan caawimaada saxda ah xiliga kuhaboon si looga hortago halisaha ilaalinta badqabka, loogana difaaco arimaha ugasii dari kara halisaha jira iyo hormarinta faya dhawrka ilmaha. Daraasad iyo baaritaano daran oo lagu sameeyay kiisaska ayaa si joogto ah umuujinaaya khataraha ka imaanaaya inaan laqaadin talaabo waxtar leh.[13] Macluumaad faahfaahsan oo kusaabsan dib u eegisyada kiisaska adag ayaa laga heli karaa Cutubka afraad ee Working Together to Safeguard Children (Kawada shaqaynta Ilaalinta Caruurta). Tusaalayaasha talaabooyinka daciifka ah waxaa kujira:

- xaraynta sharciga iyo u gudbinta calaamadaha hore ee tacadiga iyo daycaada
- duwaan haynta liidata
- in la dhagaysan waayo aragtida ilmaha
- in dib loo qiimayn waayo walaacyada marka xaalado ayna kasoo raynin

---

[13] Qiimaynta dib u eegisyada kiisaska daran ayaad kahelaysaa barta gov.uk/government/publications/analysis-of-serious-case-reviews-2014-to-2017.

- in aan lala wadaagin macluumaadka dadka saxda ah iyo hay'adaha dhaxdooda
- in macluumaadka si aad u aayar ah loo wadaago, iyo
- inaadan kucadaadin dadka umuuqda inaysan qaadayn talaabadii loobaahnaa.

## Waxay tahay in shaqaalaha dugsiga iyo kuuliyadu inay sameeyaan hadii ay qabaan walaacyo ilaalin ama ay jirto eedey shaqaale kale

71. Dugsiyada iyo kuuliyada waa inay haystaan nidaamyada u meel yaala ee lagu maamulayo **wixii** walaacyo ilaalinta ah ama eedeymo ah (inta ay doontaan ha le'elaakaadaan e) ee ku saabsan xubnaha shaqaalaha (oo ay ku jiraan shaqaalaha agabka, dadka wakhtigooda ku deeqay, iyo qandaraaslayaasha).

72. Hadii shaqaaluhu ay qabaan walaacyo ilaalin ama la eedeeyay xubin shaqaale oo kale (oo ay ku jiraan shaqaalaha agabka, dadka wakhtigooda ku deeqa, iyo qandaraaslayaasha) **waxyaalada ama khatarta waxyeelo ee caruurta**, markaa:

- waa in tan loo gudbiyaa maamulka macalimiinta ama maamulaha
- meesha ay jiraan walaacyo/eedeymo ku saabsan maamulka macalinka ama maamulaha, waa in tan loo gudbiyaa badhasaabka, gudoomiyaha gudida maamulka ama dib gaystaha dugsiga madaxa banaan, iyo
- hadii ay dhacaan walaac/eedeyn ku saabsan maamulka macalimiinta, oo maamulka macalimiintu uu yahay maamulaha kaliya ee dugsiga madaxa banaan, ama xaalada ay jiraan dano iska hor imanaya ee gaadhsiinta maamulka macalimiinta, waa in si toos ah loo gaadhsiiyaan sarkaalka ay u wakiisheen maamulka deegaanku (LADO). Faahfaahinta LADO ga deegaankaaga ayaa si fudud looga heli karaa webseedka maamulka deegaankaaga.

73. Hadii shaqaaluhu ay qabaan walaac ilaalin ama lagu eedeeyay xubin kale oo shaqaale (oo ay ku jiraan shaqaalaha agabka, dadka wakhtiga ku deeqay ama qandaraasle) oo **aanu** buuxin heerka waxyeelada, markaa waa in walaacan loo sheegaa sida ay dhigayaan siyaasada heerka hoose ee walaaca ee dugsiga ama kuuliyada. Faahfaahin dheeraad waxaa laga helayaa Qaybta afaraad nuqulka dhamaystiran ee KCSIE.

## Waxa ay tahay inay sameeyaan shaqaalaha dugsiga ama kuleejka haday walaacyo kaqabaan xeerarka ilaalinta caruurta ee kajira dugsiga ama kuleejka

74. Dhamaan shaqaalaha iyo mutadawiciintu waa inay dareemaan inay awoodaan sheegista walaacyada laxariira farsamo daciif ah ama aan badbaado lahayn iyo fashilo kadhalan kara hananaka ilaalinta caruurta ee dugsiga ama kuleejka, ayna ogaadaan in walaacyada noocaas ah looqaato kuwo halis ah ayna gaarsiiyaan madaxda sare ee kooxda.

75. Habraacyo lagu qarxin karo walaacyada noocaas ah oo haboon waa in ladajiyaa si loogu sheego madaxda sare ee kooxda hogaanka dugsiga ama kuleejka.


76. Marka xubin kamid ah shaqaaluhu uu daremo inuusan awoodin sheegista khatar ka imaanaysa qofka ay ushaqeeyaan, ama uu dareemaayo in walaacyadiisa rasmiga ah aan waxba laga qabanayn, marino kale oo ay arinta kusoo gudbin karaan ayaa u furan:

- Tilmaanta guud ee qarxinta walaaca ayaa laga heli karaa: dvice on Whistleblowing (Talada ku aadan Sheegista walaaca)

  khadka khaalka u gaarka ah waxa aad samaynayso si aad uga warbixiso tacadi ee NSPCC waxaa lagu heli karaa qaab kale oo shaqaalaha aan doonaynin inay walaaca sheegaan marka ayna jirin wax ilaalinaya oo gudaha ah, ama marka ay qabaan walaacyo ah qaabka uu dugsiga ama kuuliyadu u maaraysay walaacyo hore ah. Shaqaaluhu waxay la hadli karaan 0800 028 0285 – khadka waxaa la heleyaa 8:00 subaxnimo ilaa 8:00 habeenimo, Isniin ilaa Jimce oo waxay iimeel u diri karaan: help@nspcc.org.uk.[14]

[14] Taas badalkeeda, shaqalauhu waxay qoraal udiri karaan: National Society for the Prevention of Cruelty to Children (NSPCC, Ururuka Qaran ee Kahortaga Dhibaatada loogaysto Caruurta), Weston House, 42 Curtain, Road, London EC2A 3NH.

## Talaabooyin ku aadan meelaha ay kajiraan walaacyada laxariira ilmo yar




[1] Kiisaska ku taxaluuqa sidoo kale walaacyada ama eedeyn tacadiga ee xubin shaqaale, ka eeg Qaybta Afaraad ee nuqulka dhan KCSIE.
[2] Caawimaad hore waxaa looga jeedaa in taageero lasiiyo ilmaha isla marka dhibaatadu timaado xili kasta oo kamid ah nolosha ilmaha. In ilmuhu ka faa'iidaysanaayo caawimaad hore oo la iska kaashaday, qiimaynta caawimaada hore ee wakaaladuhu iska kaashadaan waa in la sameeyaa. Cutubka kobaad ee Working Together to Safeguard Children (Kawada shaqaynta ilaalinta caruurta) ayaa tusmo faahfaahsan kabixinaaya hanaanka cawimaada hore.
[3] Wargalinadu waa inay raacaan hanaanka udagsan ee kuqoran dukumiintiga tixraaca maxaliga ah iyo hab maamuuska qiimaynta ee maxaliga ah. Cutubka koobaad ee Working Together to Safeguard Children (Kawada shaqaynta ilaalinta caruurta).
[4] kucad Sharciga Caruurta ee 1989, maamulka deegaanka waxaa laga doonayaa inay siiyaan adeegyada caruurta baahida qaba sababo laxariira ilaalinta badqabkooda iyo hormarinta faya dhawrkooda. Caruurta baahida qabta waxaa lagu qiimayn karaa si waafaqsan farqada 17 ee Sharciga Caruurta 1989. Sida kucad farqada 47 ee Sharciga Caruurta 1989, marka maamulka maxaliga ah uu hayo sabab macquul ah oo ay uga shakin karaan in ilmo la dhibtoonaayo ama laga yaabo inuu khatar ugu jiro dhibaato wayn, waxaa masuuliyad kasaaran tahay inay samayso baaritaano si loo go'aansho in aan qaadayno talaabo si loo ilaalsho amaanka ilmaha korna loogu qado faya dhawrka ilmaha. Faahfaahin buuxda waxaad kahelaysaa cutubka koobaad ee Working Together to Safeguard Children (Kawada shaqaynta ilaalinta amaanka caruurta).
[5] Arintaan waxaa kujiri kara Dalbashada Amarka Difaaca Dedega (EPO).